



# Ma raadineysaa guri?

Talooyin loogu talogaley qofka ka raadinaya guri, magaalada Göteborg dhexdeeda iyo meelaha ka baxsan labadaba.





### **Isku day in aad hesho talooyin iyo caawimaad ku saabsan sida loo raadsado guryaha**

Meel kasta oo aad ka degentahay magaalada Göteborg waxaa aad heli kartaa talo bixin ku saabsan habka guryaha loo raadsado. Waxaa aad halkan ka heli doontaa toosin iyo talo bixin ku saabsan siyaabaha aad isku diwaan galin karto shabkadaha internetka ee laga raadsado guryaha, sida loo diro arjiyada codsiga ee guryaha iyo talooyin kale oo ku saabsan sida aad u raadsan karto guryha banaan.

Haddii aad u baahantahay talooyin dheeri ah iyo caawimaad? Waxaa aad wici kartaa xarunta xidhiidhka ee magaalada Göteborg lambarka telefoonka 031-365 00 00 si aad u hesho macluumaad ku saabsan meelaha aad ka heli karto talo bixin ku saabsan xagga deegaanka.

# Raadso guryaha wakhti fiican

Waxaa ka jira magaalada Göteborg guryo la'aan ba'an. Sidaa aawadeed waxaa kula gudboon in aad raadsato guryaha wakhti fiican. Waxaa haboon in aad safka guryaha ka gasho shirkado badan oo kala duwan oo kireeya guryaha, kuwo ku yaala magaalada Göteborg dhexdeeda iyo kuwo meelaha ka baxsan magaaladda labadaba.

Haddii aad rabto in aad ku noolato magaalada Göteborg waxaa haboon in aad iska diiwaan galiso bogga internetka ee Boplats boplats.se isla markaana aad gasho safka guryaha. Si aad iskaga diiwaan galiso bogga internetka ee Boplats boplats.se uma baahnid in aad degenaato magaalada Göteborg.

## **Waxaa haboon in aad ka raadsato dhamaan noocyada kala duwan ee guryaha, guud ahaan wadanka iswiidhan oo dhan**

Marka aad qorsheyneyso arimaha ku aadan raadinta guryaha waxaa muhiim ah in aanad raadsan oo kaliya noocygaaarka isla markaana aanad ka raadsan meelo cayiman oo kaliya. Waxaa haboon in aad raadsato dhamaan noocyada guryaha kala duwan ee jira isla markaana aad ka

raadsato guud ahaan wadanka Iswidhen oo dhan. Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad qorsheysato isla markaana aad maareyso xaaladaaada ku aadan degaanka.

Haddii aad qabto baahi guri oo aad u daran waxaa bilowga kuu sahlanaan karta in aad isku deydo in aad hesho guri aad qol ama aad qayb ahaan ka degtu.

Waxaa kale oo kuu sahlanaan kara in aad guri ka hesho magaalo kale oo guryo la'aantu ay ka sahlantahay. Haddii ay aad muhiim kuugu tahay in aad ku noolaato magaalada Göteborg, waxaa uu xalku noqon karaa in aad si ku meel gaadh ah guri uga hesho meel ka baxsan magaalada Göteborg ama magaalo kale muddada aad ku gudo jirto guri ka raadinta magaalada Göteborg isla mrakaana laga gaadhayo wakhtiga safka aad ugu jirto bogga boplatsen.se

## **Waa in aad si joogto ah u dalbataa isla markaana uusan ku dhaafin haddii gurri lagagu marti qaado**

Si dhakhso ah ayaa loo heli karaa guryaha kirada ah ee ay mulkiilayaasha guryhu soo galiyaan meelaha wax lagu xayeysiyo. Kumana xidhna in uu yahay gacan koowaad iyo gacan labaad midkoodna. Sidaa aawadeed aad bey muhuum u tahay in isha lagu hayo mar kasta e-meyl-kaaga si aanad u gafin haddii lacala lagugu marti qaado guri.

Haddii lagugu soo casuumo guri, waa in aad sida ugu dhakhsaha ugu jawaabtaa HAA in aad xiiseydneysa, haddii kale marti qaadka qof kale ayaa loo sii gudbin doonaa.

Haddii aad ka diiwaan gashantahay shabakado badan waxaa haboon in aad meel sikugu geyso macluu-madka lagu galo shabakadaha kala duwan si ay kuugu sahlanaato in aad marar badan gasho shabakadaha.

## **Ka raadso guryaha wargeesyada iyo shabkadaha intenetka.**

Inta badan guryaha banaan waxaa laga helaa oo la soo galiyaa shabakadaha internetka. Qofka aan heysan internet waxaa uu booqan karaa maktabada buuggaagta si aad u istimaasho kambiyuutradada yaala. Waxaa kale oo aad maktabda buuggaagta ka deynsan kartaa wargeesyada lagu xayeeysiyo guryaha banaan ee la kireynayo.



**Ku qor  
halkan!**

**Shabakadaha shirka-  
daha kireeya guryaha**

**Macluumaadka  
lagu galo ama  
e-meylkaaga**

**Qoraalada kuu  
gaarka ah**

# **Fadlan iska diiwaan gali shabakado badan oo kala duwan ee shirkadaha kireeya guryaha**

Magaalada Göteborg waxaa ka jira xafiiska kireeya guryaha oo ay dagmadu iska leedahay (bostadsförmedling) iyo waliba shabakado ay iska leeyihii shirkadaha kireeya guryaha kuwaas oo si gaar ah loo leeyehay, halkaas oo aad iska diiwaan galin karto. Waxaa kuu fududaan doona si aad u hesho gurri haddii aad iska diiwaan galiso shabakadaha kireeya guryaha oo badan oo kala duwan.

## **Shikada guryaha ee danta guud ee degmada Göteborg ay iska leedhay**

Waxaa jira afar shirkadood oo kireeya gurha danta guud oo ay degmada Göteborgka iska leedhay, kuwaas oo kala ah:

- » Bostadsbolaget
- » Familjebostäder
- » Gårdstensbostäder
- » Poseidon

Waxaa ay guryaha banaan ku xay-eeysiyaana boplats.se ama goobaha gaarka ee lagu magacaabo.

## **Iska diiwaan gali boplats.se**

Boplats Göteborg waa xafiiska xid-hiidhka guryaha oo ay dagmadu iska leedahay (bostadsförmedling). Qii-maha xubunimada in lagu jiro safka guryaha waa 200 karoон sannadkii.

Maadaama dhamaan guryaha la soo galiyo shabakada boplas.se la siiyo dadka haysta dhibcaha ugu badan, waxaa dhici karta in ay qaadato muddo dheer in la helo guri gacan koobaad ah. Inta badan waxaa ay qaadataa sannado badan. Sidaa awadeed waxaa muhiim ah in la iska diiwaan galiyo shabakada boplats.se wakhti hore isla markaana si joogto ah loo bixiy lacagata xubnimada ee sannadlahaa ah si aad guri uga raadasan karto mustaqbalka.

## **Talo bixin ku saabsan sida guryaha looga raadsado boplats.se**

- » Raadsado guryaha cusub
  - » Raadsado guryo yar-yar
  - » Raadsado guryaha la kireysto muddo gaaban
- Akriso macluumaa gaar ah oo ku saabsan boplats.se

## **Sidan baad iskaga diiwaan galin kartaa boplats.se**

- » Booqo shabakada boplats.se
- » Taabo “Skapa konto” ee ku taal bogga qaybtiisa kore ee midig
- » Ku buuxi macluumaa dkaaga
- » Gal bogga si aad u dhameytsirto diiwaan galinta

Ka fikir in aad bixiso khidmada lacagta xubinimada ee san-nadla si aad ugu jirto safka guryaha. Sida ugu sahlan ee aad u bixin karto waa in si toos uga bixiso bogga boplats.se adiga oo adeegsanaya kaadhka bangigga.

## **Iska diiwaan galei Shirkadaha kireeya guryaha ee sida gaarka ah loo leeyahay**

Haddii aanad ka haysan dhibco badan oo kugu filan safka guryaha ee shabakada boplats.se, waxaa aad iska diwaan galin kartaa shabkadaha kale ee kireeya guryaha gacan koobaadka ah ee ku yaala magaalada Göteborg. Sida ugu sahlan ee loo raadsado guryaha waa shabkadaha internetka ee la soo galiyo guryaha banaan, maadaama ay inta badan kala duwantahay sida iyo goobaha lagu xayeysiyo guryaha banaan.

### **Shabkadaha waawey ee la soo ga-liyo guryaha banaan ee magaalada Göeborg**

- » [www.holgerblomstrand.se](http://www.holgerblomstrand.se)
- » [www.homeq.se](http://www.homeq.se)
- » [www.hsb.se/goteborg](http://www.hsb.se/goteborg)
- » [www.kjellberg.se](http://www.kjellberg.se)
- » [www.robertdicksons.se](http://www.robertdicksons.se)
- » [www.willhem.se](http://www.willhem.se)
- » [www.wallenstam.se](http://www.wallenstam.se)

### **Shirkadaha yaryar ee kireeya guryha magaala Göteborg**

Waxaa sidoo kale jira shirkado yaryar oo kireeya guryaha gacan koobaadka ah ee magaala Göteborg.

Waxaad sida ugu fudud uga raadin kartaa shabakadda internetka. Waxaa jira bogag badan oo soo uruuriyay meelaha laga la xiriiro iyaga.



### **Ka fiirso waxaa aad lacagta ku bixineyso!**

Waxaa jira shabakadaha la soo geliyo guryaha banaan in ay qaarkood qaataan khidmad lacag ah si aad u arki karto liiska guryaha banaan. Inta badan waxaa ay shabakadahaasi dib kuu tusaan guryo lagu "xayey-siiyey" shabakada boplats.se ama shabakadaha kale ee la soo galiyo guryaha banaan.

Hadaba adiga ayey ku jirtaa haddii aad rabto in aad istic-maasho shabakadhaas iyo in kale, laakiin waxaa haboon in aad ka fiirsato adeega ay shabkadahaasi bixiyaan ka hor inta aanad lacag ku bixin.

# **Ka raadso guryaha meelo badan iyo guud ahaan wadnaka Iswiidhen oo dhan**

Waxaa guryaha ka raadsan kartaa degmooyin kale muddada aad ku jirto safka ee aad ka sugeyso in aad ka hesho gurri magaalada Göteborg.

## **Degmooyin Aadka ugu dhow magaalada Göteborg**

Waxaa aad ka raadsan karta shabkada boplats.se guryaha ku yalaala degmooyinka u dhow magaalada Göteborg. Waxaa sidoo kale jira shabakado kale oo laga galo safka guryaha oo la iska diiwaan galiyo oo aad ka raadsan karto guryaha:

- » [www.alebyggen.se](http://www.alebyggen.se)
- » [www.bofast.se](http://www.bofast.se)
- » [www.förbo.se](http://www.förbo.se)
- » [www.kungalvsbostader.se](http://www.kungalvsbostader.se)
- » [www.partillebo.se](http://www.partillebo.se)

## **Ka raadso guud ahaan wadanka Iswiidhen oo dhan**

Waxaa xitaa aad guryo ka raadsan kartaa guud ahaan Iswiidhen oo dhan. Wakhtiyada lagu lagu jiro safka guryha aad bey u kala duwan-tahay degmooyinka kala duwan ee wadanka.

Degmo kasta waxaa jira shirkado kireeya guryaha oo danta guud ah iyo shirkado si gaar ah loo leeyahay labadaba, kuwaas oo aad ka raadsansan karto guryo isla markaana waxaa aad iska diiwaan galin kartaa safka guryaha. Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan shirkadaha maxaliga ah ee kireeya guryaha waxaa aad gali karta bogga internetka ee degmo kasta.

Macluumuudku waxaa uu inta badan ku hoos qoranyahay cinwaanka "Dhismaha iyo degaanka" ("Bygga och Bo"), marka aad riixdo cinwaanka waxaa aad us ii gudbi doontaa guryaha banaan ama shirkadaha kireeya guryaha.

## **Fursado fiican oo la iskaga goosho**

Waxaa jira basas iyo tareeno u kala goosha/socda magalaada Göteborg iyo degmooyin badan oo ku xeersan magaalada Göteborg. Ka firi fursadaha kala duwan ee aad ugu kala gooshi ama safri karto shaqada ama waxbarashada.

- » [www.vasttrafik.se](http://www.vasttrafik.se)

**Talooyin kala duwan oo ku saabsan shabakadaha kala duwan ee laga raadsado guryaha ee guud ahaan Iswiidhen oo dhan:**

- » [www.homeq.se](http://www.homeq.se)
- » [www.boplatssverige.se](http://www.boplatssverige.se)
- » [www.qasa.se](http://www.qasa.se)

# Raadso guryo gacan labaad ah iyo hal qol

Maadaama oo ay inta badan qaadato muddo aad u dheer in la helo gurri gacan koobaad ah, waxaa dhici karta in ay haboontahay in la kireysto gurri gacan labaad ah ama lala dego cid kale.

## **Shabakadaha laga raadsato guryaha gacan labaadka ah iyo hal qol**

Waxaa jira shabakado badan oo la soo galiyo guryaha gacan labaadka ah iyo qolol ay haboontahay in isha lagu hayo. Waxaa aad ka jawaabi kartaa xayeysiinta la soo galiyo shabkadaha sidoo kale adiga ayaa galin kara xayeysiin in aad gurri raadineyo.

- » [www.blocket.se](http://www.blocket.se)
- » [www.qasa.se](http://www.qasa.se)
- » [www.samtrygg.se](http://www.samtrygg.se) (Xayeysiinta guryaha waaweyn ama filooyinka)


## **Ka raadsado saaxafada bulshada**

Xayeysiin badan oo ku saabsan guryaha banaan ee gacan labaadka ah iyo qolal ah ayaa la soo galiyaa baraha saxaafada bulshada. Ku biir kooxaha iyo madasha kala duwan si aad ula socotid waxyaabaha cusub ee la soo galiyo.

## **Waxaa haboon in aad sexeexo heshiiska kirada ka hor inta aanad bixin wax lacag ah**

Xasuunow in aad mar kasta kala saxeexto heshiiska kirada cida aad ka kireysaneyso gurigga ama qolka aad kireysaneyso ka hor inta aanad bixin wax lacag ah. Mararka qaarkoo waxaa uu codsadaa qofka ama shirkada wax kireyneysa in aad bixiso bixiso lacag hormarin/carbuun ama deebaaji ah ka hor inta aanad u guurin gurigga.

Lacagta hormarinta/carbuunta ama deebaajiga ah waxaa loo haystaa rahmad ahaan si qofka kireystey gurigga uu ka guuro gurriga oo bad qaba marka la gaadho wakhtigii laga guurayey gurigga. Inta badan waxaa rahmad ahaan loo haystaa laba bilood kiradooda, lacagtaas oo dib laguugu soo celin doono marka aad ka guurto gurigga.



## Noocyada kala duwan ee heshiiyda kirada

### Heshiis kirada gurigga ee gacan koobaadka

Waa heshiis kiro gurri oo si toos ah uga kireysanayeso shirkada leh gurigga ama mulkiilaha girigga.

### Heshiiska kirada gurriga ee gacan labaadka ah

Waa heshiis kiro gurri oo u dhexeeya adiga iyo qof kale ee uhaysta gurri gacan koobaad ahaan, inta badan muddo xadidan sida lix bilood ama sannad ayaa la kireeyaa guryaha gacan labaadka ah. Qofka kireynaya gurigga gacan labaadka ah waxaa uu fasax uga baahanyahay mulkiilaka ama shirkada gurigga iska leh si uu u sii kireyn karo gurigga.

### Guryaha lala dego dadka kale

Waxaa aad qayb ka kireysaneysaa gurri uu qof kale qayb ka dageyahay, tusaale ahaan qol ka mid ah gurigga. Qofka leh gurigga gacan koobaadka ah wuxuu qayb ka degenyahay gurigga isla markaana waxaa idinka dhexeyn oo aad qaybsan

doontaan goobaha guud ee la wa-daago sida tusaale ahaan jikada iyo musqusha. Si loo kireysto gurri lala dego dad kale looma baahna in loo haysto fasax gaar ah.

**Guryaha la kala bedesho** – Haddii aad haysato guri gacan koobaad ah waxaa aad ka badelan kartaa qof kale oo isaguna haysta guri kale oo gacan koobaad ah. Kala badelashada guryahaa waxaa mar kasta looga baahanyahay in uu aqbalo mulkiilayaasaha ama shirkadaha iska leh guryayah.

### Xuquuqda iyo waajibaadka guri kireystaha iyo la degaha

Bogga interntka ee maxakamadaha wadanka Iswiidhen waxaa aad ka heli kartaa maclummaad ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka dhamaan noocyada kala duwan kiyestayaasha guryaha sida gacan koobaadka ama gacan labaadka labadaba:

» <https://www.domstol.se/amnen/hyra-bostadsratt-och-arrende/hyra-av-bostad-och-lokal/>

# Adigaa mas'uul ka ah - degaankaaga

Adiga ayey ku xidhantahay mas'uuliyada in aad xal u hesho xaaladaada xagga degaanka. Ma jirto mas'uuliyada guud oo ka saaran hay'ada adeega bulshada in ay siiso gurri dadka bilaa gurigga ah ama ay xitaa ay u tilmaanto gurri ama qol banaan.

Fadlan adeegso  
liiska hubinta ee  
ku qoran xagga  
danbe ee buugan  
yar!

Guryaha gacan koobaadka ee magaalada Göteborg waxaa soo gudbisa boplats.se ama shabakadada kireeya guryaha ee sida gaarka ah loo leeyahay.

## Haddii aad halis ugu u jirto in aad noqoto bilaa gurri.

Haddii aad halis ugu jirto in aad noqoto bilaa gurri (aanad haysan haba yaraatee meel aad madaxa la gasho), waxaa muhiim ah in aad ka raadsato guri meelo badan oo kala duwan.

Waxaa ay taas macnaheedu tahay in aad raadsato dhamaan noocyada kala duwan ee guryaha ee jira, sida tusaale ahaan:

- » Meel sariirta la dhigto
- » Qol
- » Guryo lagu habeen dhaxo/vandrarhem
- » Guryaha la galoo xiliga xagagag
- » Aqal la ijaarto/lägenhet
- » Gurri

## U sheeg in aad raadineyso gurri

Waxaa sidoo kale muhiim ah in aad sameyso wax kasta oo kula gudboon iyo wado kasta oo kuu banaan isla markaana aad isticmaasho si aad u hesho gurri shabakda bulshada kugu xeersan iyo dadka aad taqaano. In aad u sheegto asxaabta iyo dadka kale ee aad taqaano in aad raadineyso guri waxaa dhici dhici karta in ay ku caawiso.

## Qor ama diiwaan gali gurri raadintaad

Qor dhamaan shirkada kireeya guryaha iyo shirkadaha guryaha xayey-siiya, fadlan qor:

- » Sida aad ula xidhiidhey
- » Goorta aad la xidhiihdey
- » In aad jawaab heshey iyo in kale Meel ku ka keydi dhamaan codsiyada iyo jawaabaha aad heshey. Waxaa

ay tani u fiicantahay diiwaankaaga.  
Waxaa kale oo muhiim ah in aad  
soo bandhigi karto waxyaabaha  
aad sameysey si aad u xaliso in aad  
hesho guri, haddii aad lacala u baa-  
hato in aad ka codsato kaalmo gurri  
hay'ada adeega bulshada.

### **Goorma ayey hay'ada adeega bulshadu kaa caawin karaan degaan?**

Marxladaha qaarkood waxaa aad  
caawimaad ka heli kartaa hay'ada  
adeega bulshada si loo xaliyo  
xaaladaad guri la'aanta. Waxaa loo  
baahanyahay in aad marka hore  
sameyso wax kasta oo awoodaada  
ah si aad u xaliso xaaladaada guri  
la'aanta, laakiin hadii aad ku guul  
dareysatey in aad xaliso xaaladaada  
guri la'aanta.

In ay adagtahay in guryo laga helo  
magaala Göteborg ma ah sabab aad  
uga heli karto caawimaad hay'ada  
adeega arimaha bulshadu. In deyn  
lagugu leeyahay lafteedu maaha  
sabab ku filan in aad ka hesho  
hay'ada adeega arimaha bulshadu  
caawimaad ku saabsan xaaladaada  
degaanka.

La xidhiidh hay'ada adeega arimaha  
haddii u baahantahay maclummad  
dheeri ah.

### **Waxaa haboon in aad maareyso xaaladaada dhaqaale**

Haddii lagu leeyahay deyn waxaa  
dhici karta in ay caqabad adag ku  
noqoto fursada in aad hesho guri  
kiro ah.

Waxaa lagaa caawin karaa inaad ni-  
daamsatid dhaqaalahaaaga oo sidoo  
kale codsatid deyn iska nadiifin loo  
maro xafiiska miisaaniyadda iyo talo-  
bixinta deymaha.

### **Macluumaaad ku saabsan siyaabaha kala ee loola xidhiidho talo bixaayaasha miisaaniyada iyo deymaha**

**Lambarka telefoonka:**

031-368 08 00

**E-post:**

[budget@kom.goteborg.se](mailto:budget@kom.goteborg.se)

**Cinwaanka booqashada**

Ekelundsgatan 1

Fadlan ka fiiri bogga internetka  
ee [goteborg.se/privatekonomi](http://goteborg.se/privatekonomi)  
wakhtiyada booqashada iyo  
wakhtiyada ay ka jawaabaan  
telefoonada.

# **Liis loogu talogaley marka la raadsanayo guryaha**

- Iska diiwaan gali bogga boplates.se isla markaan uruurso dhibcaha safka guryaha**
  - Xasunow in aad bixiso khidmada lacagta ee xubunima sannadkii
  - Xasuusnow in aad cusbooneysiiso macluumaadkaaga shaqsiga si aanad u gafin guryha la isku marti qaado
- Iska diiwaan gali shabakadaha guryaha ee sida gaarka ah loo leeyehy**
  - Sida tusaale ahaan HomeQ, Willhem, Wallenstam, HSB, iyo kuwo kale oo badan
- U dir telefoon iyo e - meyk shirkadaha kireeya guryaha ee sida gaarka ah loo leeyahay**
  - Weydii haddii ay hayaan guryo banaan iyo waxa kula gudboon in aad sameyso si aad codsi in aad xiiseyneso ah ugu dirto
- Raadso guryo gacan labaad ah iyo kuwo dad kale lala dagayo**
  - Si firfircooni ku jirto uga raadso shabakadaha internetka badan oo kala duwan gurya gacan labaadka ama hal qol
  - Ku qor iidheh ama xayaysiino madalo badan oo kala duwan, sidaa tusaale saxaaafada bulshada
  - Waxaa haboon in aad mar kasta saxeexdo heshiiska kirada gurigga ka hor inta aanad wax lacag ah bixin ah!
- U sheeg asxaabtaada iyo dadka kale ee aad taqaano in aad guri raadineyso**
  - Istimmaal bulshada kuu xeersan si aad caawimaad dheeri ah uga hesho, tusaale ahaan ku qor fariimo saxaada bulshada si asxaabtaadu u aragto

- **Ku dhaji warqado iidheh ah xaafadaha in aad raadiney-so guri**
  - Ku dhaji warqado xayeysiin/iidheh ah tukaanada cuntaada, maktabada buuggagta ama goobaga kale ee ka dhaxeysa bulshada
- **Ka raadso guri meelo ka baxsan magaala Göteborg**
  - Hubi in ay jirto fursad ah in aad safar ugu gooshi karto shaqada ama waxbarashada
  - Booqo bogga internetka ee degmooyinka kala duwan si u ogaato sida aad u gali karto safka guryaha
- **Iska bixi wixii deyn lagugu leeyahay ama doono caawi-maad talo bixiyaha xagga miisaaniyada iyo deymaha**
  - Waxaa uu arinkani kuu sahli karaa in aad hesho heshiis guri ama guri
- **La xidhiidh talo bixiyaha xagga degaanka si aad u hesho caawimaad ku saabsan sida loo raadsado guryaha**
- **Diiwaan gali ama samee qoraalo ku saabsan sida aad u raadsato guryahay**
  - In saad sameyso qoraal adiga ayen dantaada tahay iyo in aad tustoo hay'ada adeega arimaha bulsha haddii aad lacala ka codsto caawimaad hay'ada adeega arimaha bulshada

# **Macluumaaadka sida loola xidhiidho**

## **Boplats Göteborg**

**Lambaraka telefoonka:** 031-100 250

**Cinwaanka booqashada:** Rosenlundsplatsen 1  
411 20 Göteborg

**Webbplats:** [www.boplats.se](http://www.boplats.se)

Fadlan ka fiiri bogga internetka ee boplats.se/  
kontakta/kundtjanst wakhtiyda booqashada iyo wakh-  
tiyada ay ka jawaabaan telefoonada.

## **Tal xagga degaanka/raadinta guryaha**

**Lambaraka telefoonka:** 031-365 00 00  
(xarunta xidhiihdk magaalaga Göteborg)

**Webbplats:** [www.goteborg.se/sokabostad](http://www.goteborg.se/sokabostad)